



TALLAALADA LOOGU TALAGALAY DADKA KA WEYN 65 SANO

Khatarta ah in qofka uu ku dhaco caabuqyo halis ah ayaa sii kordhaysa Marka qofak da'du sii korodho.

Sidaas awgeed, dhammaan dadka jira 65 sano ama ka weyn ee ku nool gobolka Västra Götaland waxaa loo soo bandhigayaa dhowr tallaall oo muhiim ah.

Waxaad iska tallaali kartaa xaruntaada caafimaadka (vårdcentral) ama goobaha tallaalka.

Tallaalka COVID-19 waxaa la bixiyaa xilliga dayrta

Tallaalku waa lacag la'aan haddii aad:

- Jirto 75 sano ama aad ka weyntahey
- Jirto inta u dhaxaysa 65 iyo 74 sano isla markaana aad ka tirsan tahay koox caafimaad ahaan khatar ugu jirto inaad xanuunada ku qaadi si sahlan
- Jirto 65 sano ama aad ka weyntahet isla markaana aad guriga ku hesho daryeel maalinle ah (tusaale ahaan adeegga guriga (hemtjänsten) ama aad degentahtahey deegaanad loogu talo galey dadka qaba baahiyaha gaarka ah)

Si aad u hesho difaac wanaagsan waxaad u baahantahey in aad is tallaasho sanad kasta xiliga deyrta.

Tallaalka hargabka waxaa la bixiyaa xilliga dayrta

Tallaalku waa bilaash haddii aad jirto:

- 65 sano ama aad ka weyntahey

Si aad u hesho difaac wanaagsan waxaad u baahantahey in aad is tallaasho sanad kasta xiliga guga.

Tallaalka Pneumokooker waxaa la bixiyaa sanadka oo dhan

Pneumokookarku waa bakteeriya keeni karta cudurro halis ah oo ku dhaca dadka waayeelka ah, sida oof-wareen ama dhiigsumow (sepsis).

Tallaalku waa bilaash haddii aad jirto:

- 65 sano ama aad ka weyntahey

Si aad u hesho difaac wanaagsan waxaad u baahantahey in aad is tallaasho hal mar oo kaliya adigoo qaadanaya tallaalka la cusboonaysiiyay ee sannadka 2026.

Booqo bogga 1177.se

Bogga 1177.se waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaallada, haddii aad ka mid tahay kooxda caafimaad ahaan halis ugu jira in ay si sahlan u qaadaan cudurad, waxaa kale oo aad ka ogaan kartaa sida loo qabsado balanta tallaalka.



1177.se/vastra-gotaland/vaccinationer-for-dig-over-65